



# NAAR NEDERLAND

HANDLEIDING

SOOMAALI



[www.naarnederland.nl](http://www.naarnederland.nl)

## 1. HORDHAC

Qaar ka mid ah dadka mardhow Nederland yimid ee raba inay waddanka waqti dheer joogaan, laga bilaabo 15 Maarso 2006, waxaa looga baahan yahay inay lahaadaan oggolaansho degaansho ku meel gaar ah, waxaa kale oo looga baahan yahay inay galaan imtixaanka bilowga ah oo dibadda lagu qaado ee dhex-galka bulshada kahor intaanay imaan Nederland. Tani waxay khusaysaa dhammaan dadka da'doodu udhaxayso 18 ilaa 65 oo u imaanaya Nederland inay qoys la sameeyeen qof mar hore waddanka ku noolaa ama ay u yimaadaan xubno qoyskooda ka mid ah oo hore waddanka ugu noolaa. Kuwa dalka u imaanaya shaqo diin ahaaneed – sida imaamka masaajidka – waxaa sidoo kale looga baahan yahay inay galaan imtixaanka bilowga ah ee dhex-galka bulshada inta aanay Nederland imaan kahor.

Xirmadan waxbarasho ee aad adigu-isbarayso waxay kaa caawinayaan inaad barato luqadda Nederlandayska ah ee bilowga ah iyo inaad wax ka fahanto bulshada Nederlandayska. Waxay sidoo kale kaa caawinaysaa inaad imtixaanka isu diyaariso. Hagahan dadka isticmaalaya waxuu sharaxayaa saddexda qaybood ee imtixaanka, waxuuna kuu sheegayaa waxa lagaaga baahan yahay inaad qayb walba samayso. Waxuu sidoo kale kaala talinayaa xirfadaha aad imtixaanka u baahantahay iyo sida aad imtixaan kasta isagu diyaarinayso.

Isticmaalka xirmadan waxbarasho ee aad adigu-isbarayso waxaa dheer, qofka aad isqabtaan, ee hore Nederland u joogay, ayaa kaa caawin kara inaad imtixaanka isu diyaariso. Akhri hagahan isticmaalayaasha, si wadajira ah u fiiriya waxyaabaha uu ka koobanyahay oo si wada-jir ah u qorsheeya jadwalka waxbarasho. Ka fikir sida aad casharada u samaynayso iyo dhaqsaha aad ku samaynaysid. Qofka aad isqabtaan u sheeg horumarkaaga, asaga ama ayadana talooyin waydii.

## 2. IMTAXAANKA

### Maxaa lagugu imtixaamayaa?

Imtixaanka bilowga ah ee dhexgalka bulshada ee dibadda lagu qaado waxuu ka kooban yahay saddex qaybood. Waxaad u baahan tahay inaad saddexda qayboodba aad ka gudubto si aad imtixaanka ugu guulaysato. Haddii aad qayb kamid ah imtixaanka ku dhacdo, imtixaanka oo dhan waad ku wada celindoontaa.

### 1. Imtixaanka *Kennis van de Nederlandse Samenleving (KNS)* (Aqoonta Bulshada Nederlandayska)

*Kennis van de Nederlandse Samenleving* qaybtan waxaa ku jira su'aalo aqoontaada bulshada Nederlandayska lagu imtixaamay. Waxaad ka jawaabi doontaa su'aalo ka hadlaya masawiro Af Nederlandays ah.

### 2. Imtixaanka *Toets Gesproken Nederlands (TGN)* (Nederlandayska lagu hadlo)

Qaybtan waxay imtixaamaysaa xirfaddaada luqadeed ee Nederlandayska (dhagaysi iyo hadlid). Heerka loo baahan yahay ee dhagaysiga iyo hadlidda waa A1. Heerkan waxuu ku salaysan yahay *Raamwerk voor Moderne Vreemde Talen* (Nidaamka Guud ee Tix-raaca Luqadaha Yurub).

### 3. Imtixaanka *Geletterdheid en Begrijpend Lezen* (Wax-qoridda iyo fahmidda luqadda la qoro)

Luqadda Nederlandayska waxaa lagu qoraa farta Latiinka. Imtixaanka *Geletterdheid en Begrijpend Lezen*, waa inaad akhrin kartaa Nederlandaysk heerka A1 oo ah *Raamwerk voor Moderne Vreemde Talen* (Wax-qoridda iyo fahmidda luuqadda la qoro).

### 3. WAXA KU JIRA XIRMADAN

Xirmadan waxay kaa caawinaysaa inaad si madaxbanaan isugu diyaariso saddexda imtixaan. Waxaa ku jira waxyaabahan aad adigu isbari karto:

- Hagahan isticmaalaha oo wata CD cod ah
- DVD-ga ama fidiyowga filimka *Naar Nederland*
- Buugga masawarida ee *Naar Nederland* oo uu la socdo CD cod leh
- Buug CD cod leh wata ee *Naar Nederland, Nederlands voor anderstaligen*
- DVD wata layliyo lagu barbarto
- Fure lagu-galo layliyada lagu barbarto ee Internetka ku jira
- 2 TIN fure (lambara aqoonsiga imtixaanka) ee imtixaanka barbarashada ee TGN
- 2 TIN fure (lambara aqoonsiga imtixaanka) ee imtixaanka barbarashada ee GBL

### 4. ISU DIYAARINTA IMTIXAANKA KNS

#### Filimka *Naar Nederland*

Imtixaanka KNS waxuu ku saabsan yahay aqoontaada Nederland. Wax walba oo aad u baahan tahay inaad ogaato waxaa lagu daray filimka, kaas oo loogu magacdaray *Naar Nederland*. Filimku waxuu tusayaa sida dadka Nederland jooga ay u noolyahiin, dhaqamadooda iyo caadooyinkooda, iyo sida ay isula dhaqmaan. Waxaa lagu siinayaa talooyin la taaban karo oo ku anfacaya marka aad Nederland ku nooshahay. Filimku waxuu soconayaa qiyaastii 110 daqiiqo, waxaana loo qaybiyay mowduucyadan soo socda:

1. Juquraafiga iyo guryeynta
2. Taariikhda
3. Siyaasadda iyo baarlamaanka
4. Luuqadda Nederlandayska iyo sida loo barto
5. Waxbarashada iyo barbaarinta carruurta
6. Daryeelka caafimaadka
7. Shaqada iyo dakhliga
8. Sidee ayaan imtixaan safaaradda ugu samayn karaa?

#### Buugga masawirada oo leh 100 su'aalood

Filimka *Naar Nederland* waxaa la socda buug masawiro leh iyo CD cod wata. Buugga masawirada waxaad ku arki kartaa 100 masawir lambaro leh oo ah muuq laga soo xulay filimka. Masawiradu waxay u soo baxayaan sida ay ugu duuban yahiiin CD dhagaysiga. Su'aalahani waa Nederlandays. Waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad Dutch ku jawaabi karto. Buugga masawirada dhexdiisa iyo CD-ga, waxaad ka akhrin kartaa oo aad dhagaysan kartaa su'aalaha iyo jawaabaha. Waxaad u baahan doontaa inaad ogtahay jawaabaha oo dhan marka aad imtixaan galayso.

Imtixaanku waxuu ka kooban yahay 30 su'aalood – kuwan oo dhan waxaa laga soo xulay 100 ka su'aalood ee ku jira buugga masawirada iyo CD-ga.

#### Tilmaamo

Isla filimkaa ayaa ku jira dhamaan lixda DVD ee xirmadan. DVD-yada 1, 2 iyo 3 ayaa ku shaqaynaya PAL/SECAM. DVD-yada 4, 5 and 6 ayaa ku shaqaynaya NTSC. Waa inaad isticmaasho habka laga isticmaalo dalka aad joogto. Si aad u ogaato nooca, waa inaad la tashato buugga la socda DVD player-ka aad isticmaalaysid ama aad ka eegto websaytka [www.naarnederland.nl](http://www.naarnederland.nl).

Luqadaha caawinta ayaa lagu daabacay DVD-yada: Shiine, Dari, Nederlandays, Ingiriis, Fransiis, Indonaysiyan, Kurdi (Kurmanji), Carabiga Marooko, Pashto, Burtaqiis, Riff Berber, Ruush, Isbanish, Carabi, Soomaali, Taylandays, Turki, Urdu iyo Fiyadnamays. Daaro DVD-ga aad ku aragto in caawinaadda luqaddaadu ay ku jirto. Waxaad dooran kartaa luqaddaada caawinaada adiga oo

isticmaalaya badhamada menu-ga ee DVD-gaaga. Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad DVD oo dhan ama qayb ahaan filimka fiirsato.

Si aad imtixaanka si buuxda ugu diyaargarowdo, waa inaad tilaabooyinkan raacdaa:

1. Filimka dhow jeer caawinaadda luqaddaada ku fiirso, ilaa iyo inta aad garanayso waxa ku jira.
2. Kadibna ku fiirso filimka Nederlandays.
3. Qayb walba oo filimka ah luqaddaada ku fiirso kadibna Nederlandays.
4. Qayb walba, tababaro adigoo adeegsanaya su'aalaha buugga masawirada.
5. Dhagayso su'aalaha ku duuban CD-ga. Kuna celi jawaabaha.
6. Jawaabaha iska qari kadibna masawirada oo kaliya fiiri. (Imtixaanka, waxa kaliya oo aad awoodaa inaad ka tixraacdo buugga masawirada, inta aad dhagaysanayso su'aalaha).
7. Ku barbaro su'aalaha oo dhan ilaa inta aad jawaabaha oo dhan si wanaagsan ugu dhawaaqi karto.
8. Isku qas su'aalaha marka aad barbaranayso; sida ay isagu aadan yahiiin oo kaliya ha isticmaalin.
9. Ku dhawaaq marka aad barbaranayso; si hoose oo cad u hadal.
10. Telefoonka luqadda kula tababaro qofka aad is qabtaan ama qof kale oo Nederlandayska ku hadla. Si gaar ah ku dhawaaqiddaada ugu fiirso; si cad oo aan aad u hoosayn u hadal.
11. Sidoo kale ku tababaro bilowga imtixaanka. Waxaad maqlaysaa: 'Zeg de naam van de stad en het land waar u nu bent'. Kadib waxaad u baahan tahay inaad tiraahdo magaca maaladaada iyo wadankaaga.
12. Filimka mar kale Nederlandays ku fiirso. Hadda oo aad ogtahay su'aalaha, si wanaagsan ayaad u sii fahmidoontaa.

Isu diyaarinta imtixaanka KNS waxaa lagu samayn karaa si ka dhaqso badan isu diyaarinta labada imtixaan ee luqadda ku saabsan. Waxaa wanaagsan inaad isku diyaarintaada ku darto qaybaha imtixaanka oo dhan. Erayo badan oo lagu isticmaalay filimka *Naar Nederland* waxay sidoo kale ku imaan karaan imtixaanada luqada. Marka aad fiirsato oo dhagaysato nooca filimka ee Nederlandayska ah, waxaad sidoo kale baranaysaa dhawaaqyada luqadda Nederlandayska.

## 5. ISU DIYARINTA IMTIXAANADA LUQADDA

### Isticmaalidda buugga-layliyada iyo ku barashada kombiyutarka

Hadii aad raacdo casharada Nederlandayska ee xirmadan, waxaad baranaysaa inaad isku hal mar akhrido, dhagaysato oo aad ku hadasho. Tan waxay kaa caawinaysaa inaad isu diyaariso labada imtixaan ee luqadda - imtixaanada TGN iyo GBL.

Inta aadan isku diyaarin imtixaanada TGN iyo GBL, waxaad u baahan tahay inaad barato sida wax loo akhriyo ee wax loo qoro. Luqadda Nederlandaysku waxay isticmaashaa qoraalka Laatiinka, sida Ingiriiska, Isbanishka, Faransiiska iyo Bortuqiiska. 20-ka cashar ee ugu horraysa waxay ku barayaan qoraalka Laatiinka iyo dhammaan dhawaaqyada kala duwan ee luqadda Nederlandayska. Waxaad baranaysaa sida xarfaha erayo looga sameeyo iyo sida xaraf walba u dhawaaqo. Waxaad sidoo kale baranaysaa sida erayada Nederlandaysku u dhawaaqaan.

Dadka wax akhriin kara oo wax qori kara oo Laatiinka ku bartay luqaddooda waxay ka bilaabi karaan casharka 21-aad. Si kastaba ha ahaatee, waxaan wali kugula talinaynaa inaad akhrido casharada 1 - 4 iyo casharka 20. Casharadan waxaad barbaranaysaa dhawaaqyada iyo xarfaha Nederlandayska.

Laba hab ayaad casharada u raaci kartaa:

1. Waxaad raaci kartaa casharada buugga-layliyada adiga oo isticmaalaya CD-yada codka kuwaas oo la socda buugga-layliyada.

Wadajir, 65-ta cashar waxay samaynayaan koorso Nederlandays ah oo aad adigu isbari karto. Waxay ku barayaan inaad akhrido, dhagaysato oo aad hadasho. Waxaad u baahan tahay walax aad CD-ga ku dhagaysato si aad koorsadan u la socoto.


2. Casharada waxaad kala socon kartaa adiga oo kombiyutar isticmaalaya.

Haddii aad kombiyutar haysatid, waxaad isticmaali kartaa barnaamijka barbarashada ee kombiyutarka. Barnaamijkan waxaa ku jira casharada buugga ku qoran. Barnaamijka barbarashada waxaad ku shubi kartaa komiyutarkaaga (tan DVD-ga u isticmaal) ama waxaad isticmaali kartaa barnaamijka barbarashada ee Internetka (u isticmaal tan furaha lagu galo). Faa'iidada barnaamijka barbarashada ee Internetka waxay tahay in qofka aad isqabtaan uu sidoo kale arki karo horumarka aad gaartay. Waxay sidoo kale kuu oggolaanaysaa inaad layliyada inta aad rabto aad ku cel-celiso.

Dabcan, labada hab waad isku dari kartaa.

### Tilmaamaha habka isticmaalka buugga-layliya

#### Si guud

- Si dagan u akhri ama u fiiri tilmaamaha layli walba dushiisa ku yaal. Fiiri masawirka tusaalaha ku yaal.
- Qof walba loogama baahna inuu layliyada oo dhan sameeyo. Haddii aadan qori karin oo aadan akhrin karin ama heerkaaga waxbarashadu uu xadidan yahay, waxaad ka boodi kartaa qaybaha oranjiga ama hurdiga ah. Lagaagama baahna inaad meesha xiddigta sacfaraanka ah leh ee banaan aad adiga wax ku buuxiso. 
- Waxaan kugula talinaynaa inaad qalin-goome aad isticmaasho. Markaa layliyada waad saxi kartaa oo markale ayaad samayn kartaa.
- Casharada la samee qof yaqaana luqadda Nederlandayska. Sidan, waxaad ku hubin kartaa in ku dhawaaqiddaadu ay sax tahay.
- Qofka aad isqabtaan waxuu kaa caawin karaa inaad turjunto erayada. Website-ka [www.naarnederland.nl](http://www.naarnederland.nl), adigu (ama qofka aad isqabtaan) waxaad ka soo qaadan kartaa oo aad daabacan kartaa liiska erayada ee luqaddaada ku qoran.

#### Kuwa aan akhrin karin ama aan qori karin ama kuwa far aan Laatiin ahayn wax ku qora

- Casharada 1 ilaa 20, waxaad ku baranaysaa farta Laatiinka, dhammaan dhawaaqyada luqadda Nederlandayska ah ku jira iyo erayadaada ugu horreeya ee Nederlandayska ah. Marka aad casharadan dhammayso, hadda waxaad Nederlandayska ku akhrin kartaa heer bilow ah.
- Casharka 21 iyo inta ka danbaysa, waxaad ku baran doontaa sida loo akhriyo, loo fahmo looguna dhawaaqo erayada Nederlandayska ah iyo jumladaha. Waxii ka danbeeya casharka 65, waxaad dhammaysitir kartaa labada imtixaan ee tijaabada ah.















#### Kuwa garanaya farta Laatiinka

- Casharada 1 ilaa 4, waxaad ku baran doontaa dhammaan dhawaaqyada luqadda Nederlandayska casharka 20 -aadna waxaad ku baran doontaa dhammaan xarfaha alifbetada ee luqadda Nederlandayska.
- Casharka 21 iyo inta ka danbaysa, waxaad baranaysaa inaad akhrido, fahanto oo aad ku dhawaaqdo erayada Nederlandayska iyo jimlooyinka. Waxii ka danbeeya casharka 65, waxaad dhammaysitir kartaa labada imtixaan ee tijaabada ah.

### Tilmaamaha wax ku barashada kombiyutarka

- Si dagan u fiiri ama akhri tilmaamaha layliga dushiisa ku yaal. Kan waxaad ku dhagaysan kartaa luqaddada adiga oo riixaya icon-ka sameecadaha. Si taxadar leh u fiiri tusaalayaasha ku yaal bilowga layliga.
- Casharada la samee qof yaqaana luqadda Nederlandayska, tusaale ahaan qofka aad isqabtaan ama qof jooga deegaanka aad ku nooshahay. Waxay hubin karaan in dhawaaqiddaadu ay sax tahay. Qofkani waxuu sidoo kale gali karaa barnaamijka barbarashada ee Internetka ku jira si uu u arko halka aad ka gaadhay casharada.

## Tilmaanta icon-da layliyada

 akhri / arag	 dhawaaq
 ku celi / akhri / si kore	 riix / jiid / dooro
 dhagayso	 tiri
 tilmaan / dooro	 bidix ilaa midig
 goobo gali	 kor ilaa hoos
 xariiqin mari	 su'aal
 eray dhammaystir / buuxi	 dhanka kale

## 6. TILMAAMAHA FARSAMO EE WAX KU BARASHADA KOMBIYUTARKA

### Bilaabidda Naar Nederland e-learning

Barnaamijka kombiyutarka ee *Naar Nederland* waxaa loo isticmaali karaa laba siyaabood:

(1) Internetka dhexdiisa (2) Isticmaalidda DVD-ga *Naar Nederland - e-learning*.

#### 1. Ku barashada kombiyutarka Internetka

Si loo isticmaalo habka ku barashada kombiyutarka ee Internetka, waxaad u baahan tahay kombiyutar Internet leh.

- fur web browser -ka
- aad websiteka [www.naarnederland.nl](http://www.naarnederland.nl)
- riix badhanka *inloggen e-learning*
- furaha gali, kaas oo aad ka helayso baalka inloggen e-learning
- raac tilmaamaha shaashadda ku yaala

#### 2. Isticmaal DVD-ga ku barashada kombiyutarka

Si aad DVD u isticmaasho, waxaad u baahan doontaa kombiyutar lagu daari karo DVD.

- Kombiyutarka gali DVD-ga *Naar Nederland - e-learning*.
- Barnaamijku isaga ayaa is daaraya. Tani daqiiqado yar ayay qaadan kartaa.
- Kadibna raac tilmaamaha shaashadda ku yaala.

Kadib marka aad bilowdo barnaamijka ku barashada kombiyutarka, shaashaddu waxay furmaysaa iyada oo wadata doorashooyin kuu gaar ah.

Shaashaddan dusheeda, waxaad (1) galin kartaa magacaaga, (2) waxaad dooran kartaa luuqad ku caawisa iyo (3) waxaad dooran kartaa habka aad wax ku baranayso.

Waxaad ka kala dooran kartaa saddex nidaam oo barasho.

- **Habka 1:** waxaa loogu talagalay kuwa aan awoodin inay wax akhriyaan oo wax qoraan, kuwa isticmaala qoraal u gaar ah luqadda ay ku hadlaan, iyo kuwa qaatay in ka yar lix sano oo waxbarasho ah.
- **Habka 2:** waxaa loogu talagalay kuwa qaatay sanado yar oo waxbarasho dugsiga sare oo wax ka yaqaan farta Laatiinka.
- **Habka 3:** waxaa loogu talagalay kuwa dhammaystay dugsiga sare ama ka sareeya, waxna ka yaqaana farta Laatiinka.

Hadii aadan hubin, waxaa haboon inaad doorato habka 1. Marwalba waad badali kartaa habkaaga waxbarasho haddii ay kula noqoto inaad si dhakhso ah ama si culus wax u baranayso.

Su'aalaha ku saabsan ku barashada kombiyutarka, waxaad ka fiirin kartaa websaytka *Naar Nederland*. Waxaad ka heli doontaa su'aalaha badanaaba la iswaydiyo, adiga oo riixaya link *e-learning Naar Nederland*.

## 7. IMTIXAANADA BARBARADKA EETGN IYO GBL

Marka aad casharada oo dhan dhammayso, waxaad taqaan Nederlandays kugu filan oo aad imtixaanka barbarashada aad ku samayso. Waxaa muhiim ah inaad ogaato nooca su'aalaha ku imaan doona imtixaanka runta ah. Layliyada buugga-layliyada iyo barnaamijyada kombiyutarka, waxaad ku tababaraday su'aalo kuwaas la mid ah. Qaybta ugu danbaysa ee is-diyarintaada, waxaad samayn kartaa laba imtixaan oo barbarasho ah, kuwaas oo la mid ah imtixaanka ugu danbeeya.

### Macluumaad guud oo ku saabsan imtixaanada barbarashada

Imtixaanka dhabta ah waxaa lagu qaadayaa telfoonka. Kombiyutar codka garanaya ayaa kuu sheegi doona waxa aad samaynaysid iyo sida aad codka u duubayso. Qaybta 8 ee filmka *Naar Nederland* waxuu ku tusayaa sida aad tan u samaynayso.

Imtixaanada barbarashada ee TGN iyo GBL wax yar ayay ka yar yahii imixaanka dhabta ah, laakiin marka taas laga reebo waa isku mid. Imtixaanada barbaradka ahi waxay kuu ogolaanayaan inaad dareento sida uu yahay imtixaanka dhabta ah. Imtixaanka barbaradka ah ee TGN waxuu ku tusayaa in aad si kugu filan ugu hadli karto oo aad u fahmi karto Nedelandayska, si aad imtixaanka dhabta ah ee TGN u gasho. Imtixaanka barbaradka ah ee GBL waxuu ku tusayaa in aad Nederlandays kugu filan akhrin karto si aad u samayso imtixaanka dhabta ah ee GBL. Kadib marka aad imtixaanka barbaradka ah samayso, waxaa sidoo kale lagaa siinayaa qiyaasta gudbidaada websaytka [www.naarnederland.nl](http://www.naarnederland.nl). Waxaa aad samayn kartaa imtixaanka barabarashada ee TGN oo ay la socdaan furayaasha TIN oo loogu talagalay TGN -ka taas oo lagu soo daray xirmadan aad adigu isbaraysid. Waxa aad samayn karaa imtixaanka barbarashada ee GBL adiga oo isticmaalaya furayaasha TIN oo loogu talagalay GBL-ka oo lagu soo daray xirmadan.

### Furayaasha TIN

Si aad u gasho imtixaanada tijaabada ah, waxaad u baahan tahay laba lambar – lambarka telefoonka iyo lambarka aqoonsiga imtixaanka (Furaha TIN). Waxaad waci kartaa kombiyutarka codka garanaya adiga oo wacaya lambarka telefoonka. Kadibna, waxaad isticmaalaysaa furaha si aad kombiyutarka ugu sheegto inuu bilaabo inuu imtixaanka kula qaato. Imtixaanka barbaradka ah, adiga ayaa furaha gashanaya. Imtixaanka dhabta ah, qof ka mid ah shaqaalaha safaaradda ayaa kuu galinaya furaha. Waxa aad sidoo kale u baahan tahay furaha TIN si aad websaytka uga fiiriso natiijada imtixaanka imtixaanka barbaradka ah.

Xirmadan waxaa ku jira imtixaan barbarasho ah ee TGN iyo warqad gaar ah oo ay ku dhigan yahiiin lambarka telefoonka iyo furaha TIN oo loogu talagalay imtixaanka barbaradka ee TGN. Imtixaanka barbaradka ah ee GBL waxuu ka kooban yahay dhowr warqadood oo ay ku daabacan yahiiin with a telephone number iyo furaha TIN oo loogu talagalay imtixaanka barabaradka ah ee GBL.

Fadlan ogow: xirmadan waxaa ku jira laba TGN imtixaan barbarasho iyo laba GBL imtixaan barbarasho. Imtixaan walba waxa aad ka samayn kartaa laba imtixaan barbarasho. Fureyaasha TIN isticmaal kaliya marka aad ogtahay in aad diyaargarow fiican samaysay.

### Sida loo sameeyo imtixaanka barbarashada

- Marka hore si dagan oo taxadar leh u akhri tilmaamahan, kadib waxa aad ogaanaysaa waxa aad imtixaanka ka fili lahayd. Waxa aad isticmaalaysaa tilmaamahan haddii aad kombiyutarka

wacayso, laakiin runtii tani muhiim ma ahan. Kombiyutarka ayaa si wanaagsan kuugu sheegaya waxa aad samaynayso.

- Telefoonka ugu fiican ee la isticmaalo waa telefoonka laynka guryaha ku jira oo leh badhamo la riixi karo. Haddii aad isticmaalayso telefoonka gacanta, tayada laynka waxaa laga yaabaa inay noqoto mid aan wanaagsanayn. Waxaa wanaagsan in aadan isticmaalin Skype ama nooc kale oo isku-xirka Internetka ah. Haddii aad soo wacdo adiga oo isticmaalaya telefoonka gacanta ama Skype, waxaa suurto gal ah in laynku go'o adiga oo samaynaya imtixaanka tababarka ah, ama tayada codku aanay fiicnaan. Waxaa suurto gal ah in aadan helin natiijada imtixaanka barbaradka ah. Taas waxaa sabab u ah tayada is-badbadali karta ee xiriirka telefoonka. Inta badan telefoonada guryaha ku jira ayaa leh codka ugu tayada fiican ee lagu gali karo imtixaanka barbaradka ah.
- Waxaa muhiim ah in codkaaga si cad loo maqli karo. U hadal si cad oo kore.
- Isticmaal meel aan qaylo lahayn oo aad ka soo wacdo. Hubi in aanay ciddina ku dhibayn. Hubi in aanay agtaada sharqan ka yeerayn.
- Dhagta telefoonka sidii saxda ahayd u qabo, sida masawirka lagugu tusay.
- Haddii aanu kombiyutarku si wanaagsan kuu maqli karin, waxuu ku waydiin doonaa inaad isasaarto. Kadibna aad markale isku daydo, laakiin waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho fure cusub oo TIN ah.



Fadlan ogow: furaha TIN hal imtixaan oo kaliya ayaad u isticmaali kartaa. Haddii uu khadku kaa xumaado, furaha TIN mar kale ma isticmaali kartid.

Fadlan ogow: natiijada waxa aad heli doontaa oo kaliya haddii aad dhammaystirtay imtixaanka oo dhan. Haddii aad isasaarto inta aan imtixaanku dhammaan, lama xisaabinayo. Si kombiyutarku u ogaado inaad joogto, marwalba jawaab bixi. Haddii aadan aqoon jawaabta, dheh "Ik weet het niet."

### Helitaanka natiijooyinkaaga

Kadib marka aad samaysay imtixaanka barbaradka ah, natiijooyinkaaga waxaad ka raadin kartaa Internetka. Aad websaytka [www.naarnederland.nl](http://www.naarnederland.nl) oo riix badhanka 'Uitslag oefentoets TGN/GBL bekijken'. Websaytku waxuu ku waydiin doonaa furaha TIN ee imtixaankaaga barbaradka ah (gali furaha sideedda lambar ah ee TIN). Kadib waxa aad arkaysaa inta aad keentay imtixaankii barabarashada ahaa. Natiijadan waxay figrad kaa siinaysaa inaad baasi karto imtixaanka dhabta ah ee TGN ama GBL.

Fadlan ogow: xataa haddii natiijadaada imtixaanka barbaradka ah ay wanaagsan tahay, taas micnaheedu ma ahan inaad marwalba baasaysid imtixaanka dhabta ah.

### Fureyaal TIN oo dheeri ah

Haddii aad isticmaashay dhammaan furayaashii TIN ee ku jiray xirmadanpack, aadna jeclaan lahayd inaad samayso imtixaano dheeri ah oo barbarasho ah, waxa aad dalban kartaa xirmo afar fure TIN oo dheeri ah. Waxaad heli doontaa:

- laba fure TIN ah oo loogu talagalay laba imtixaan barbarasho oo TGN
- laba fure TIN ah oo loogu talagalay laba imtixaan barbarasho oo GBL

· warqad la socodta oo ah hagahan isticmaalaha

Waxa aad ka dalban kartaa xirmadan dheeriga ah ee furayaasha TIN, adiga oo booqanaya websaytka [www.naarnederland.nl](http://www.naarnederland.nl).

### Imtixaanka barbarashada ee TGN

Imtixaanka TGN waxuu ka kooban yahay hordhac iyo shan qaybood (qaybaha A, B, C, D iyo E).

Layliyada qaarkood, waxaa jira in ka badan hal jawaab oo sax ah. Imtixaanku waxuu ku dhamaanayaa qiyaastii 15 daqiiqo.

Tan waa waxa dhacaya hordhaca.

Tilaabo	Sidaan ayaad samaynaysaa	Waxa dhaci doona	Waxan ayaad maqli doontaa
1	Lambarka telefoonka gali (waxuu ku yaal korka foomka imtixaanka)	Kombiyutarku Nederlandays ayuu ku jawaabayaa.	<i>“Dank u voor het bellen met het toetssysteem van Ordinate. Toets uw ToetsIdentificatieNummer in.”</i>
2	Gali <b>Furaha TIN TGN</b> telefoonkaaga (kan waxuu ku yaal buugga imtixaanka yar korkiisa)	Markaad furaha TIN si taxadar leh u eegto, kombiyutarku waxuu eegayaa in khadka telefoonku uu fiican ayay.	<i>“We testen eerst het geluid. Zeg alstublieft de naam van de stad en van het land waar u nu bent.”</i>
3	Si cad u dheh magaca magaalada iyo dalka. Waxaa kale oo aad dhihi kartaa magaalo iyo wadan oo kale. Hadii aadan si cad u hadlin, waxaa lagaa codsandoonaa inaad ku celiso.	Kombiyutarku waxuu fiirinayaa in codkaaga si cad loo maqli karo.	<i>Volg nu de instructies bij deel A tot en met E.</i>

Imtixaanku iskii ayuu u bilaabanayaa.

#### Qaybta A: Ku celin

Waxaad maqli doontaa dhowr weero ah. Midwalba kadib, weerta ugu celi isla sida aad u maqasho.

Tusaale ahaan, cod waxuu leeyahay *“Dat is een mooi verhaal”*

adiguna waxa aad leedahay *“Dat is een mooi verhaal”*.

Isku day inaad isla erayadaas adeegsato, laakiin sidoo kale isla sidii u dheh. Si dhaqso ah u hadal, oo ha hakan.

#### Qaybta B: Su'aalo

Waxaad maqlaysaa dhowr su'aalood oo gaaban. Si kooban su'aal walba uga jawaab.

Tusaale ahaan, cod waxuu leeyahay *“Als je thee zet, gebruik je dan heet water of gebruik je koud water?”*

adiguna waxaad leedahay *“heet water”* ama *“heet”*.

Ama waxaad maqlaysaa *“Een auto, heeft die twee wielen of vier wielen?”*

adna waxaad leedahay *“vier”* ama *“vier wielen”*.

**Qaybta C: Ku celin (waxay la mid tahay qaybta A)**

Waxaad maqli doontaa dhowr weero ah. Midwalba kadib, weerta ugu celi isla sida aad u maqasho. Tusaale ahaan, cod waxuu leeyahay *“Dat is een mooi verhaal”*  
Adiguna waxa aad leedahay *“Dat is een mooi verhaal”*.

**Qaybta D: Cagsiga**

Waxaad maqlaysaa dhowr eray. Waxaad dhahaysaa cagsiga eray walba. Tusaale ahaan, waxaad maqlaysaa *“hoog”*  
Adiguna waxaad leedahay *“laag”*

Ama waxaad maqlaysaa *“niet”*  
Adiguna waxaad leedahay *“wel”*.

**Qaybta E: Sheeko dib usheegid**

Waxaad maqli doontaa sheeko gaaban, taas oo aad adigu erayadaada dib ugu sheegaysid. Waxaad haysataa 30 ilbiriqsi oo aad tan ku samayso. Inta ugu badan oo aad dhihi karto dheh. Tusaale ahaan, yaa sheekada ku jira? Maxaa dhacay? Xaggee ka dhacday? Sidee ku dhamaatay? Waa in aad laba sheeko dib u sheegto.

**Dhammaadka imtixaanka, waxaad maqli doontaa:** *“Dank u voor het bellen. U kunt nu ophangen.”*  
Kadibna telefoonka waad isa saari kartaa.

**Imtixaanka barbaradka ah ee GBL**

Imtixaanka barbaradka ah ee GBL waxuu ka kooban yahay hordhac iyo shan qaybood (qaybaha A, B, C, D iyo E). Imtixaanka barbaradka ah ee GBL waxuu qaadanayaa qiyaastii 20 daqiiqo.

**Waxan ayaa dhacaya waqtiga lagu jiro hordhaca:**

Tilaabo	Tan ayaad u baahan tahay inaad samayso	Waxa dhici doona	Waxan ayaad maqli doontaa
1	Lambarka telefoonka gali ( <i>waxuu ku yaal korka foomka imtixaanka</i> )	Kombiyutarku Nederlandays ayuu ku jawaabayaa.	<i>“Dank u voor het bellen met het toetsysteem van Ordinate. Toets uw ToetsIdentificatieNummer in.”</i>
2	Gali <b>Furaha TIN GBL</b> telefoonkaaga ( <i>kan waxuu ku yaal buugga imtixaanka yar korkiisa</i> )	Markaad furaha TIN si taxadar leh u eegto, kombiyutarku waxuu eegayaa in khadka telefoonku uu fiican ayay.	<i>“We testen eerst het geluid. Zeg alstublieft de naam van de stad en van het land waar u nu bent.”</i>

<b>3</b>	Si cad u dheh magaca magaalada iyo dalka. <i>Waxaa kale oo aad dhihi kartaa magaalo iyo waddan oo kale. Hadii aadan si cad u hadlin, waxaa lagaa codsandoonaa inaad ku celiso.</i>	Kombiyutarku waxuu fiirinayaa in codkaaga si cad loo maqli karo.	<i>Volg nu de instructies bij deel A tot en met E.</i>
----------	---	--	--

**Imtixaanku iskii ayuu u bilaabanayaa.**

<p><b>Qaybta A: Erayo</b> Buugga yar ee imtixaanka waxaa ku yaala safaf erayo ah. Si kore u akhri erayada safafka ku yaala. Waxaad bilaabi kartaa marka aad dhawaaqa maqashid.</p>	<table border="1"> <tr> <th colspan="2" style="background-color: #0070C0; color: white;">Voorbeeld Woordrij A</th> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">en</td> <td></td> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">de</td> <td></td> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">ook</td> <td></td> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">bal</td> <td></td> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">wil</td> <td></td> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">zee</td> <td></td> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">ham</td> <td></td> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">boom</td> <td></td> </tr> </table>	Voorbeeld Woordrij A		en		de		ook		bal		wil		zee		ham		boom	
Voorbeeld Woordrij A																			
en																			
de																			
ook																			
bal																			
wil																			
zee																			
ham																			
boom																			
<p><b>Qaybta B: Weero</b> Buugga yar ee imtixaanka waxaa ku yaala weero. Weeraha si kore ugu dhawaaq marka aad dhawaaqa maqasho.</p>	<table border="1"> <tr> <th colspan="2" style="background-color: #0070C0; color: white;">Voorbeeld Zin A</th> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">A</td> <td>Mijn zoon is een lieve jongen.</td> </tr> </table>	Voorbeeld Zin A		A	Mijn zoon is een lieve jongen.														
Voorbeeld Zin A																			
A	Mijn zoon is een lieve jongen.																		
<p><b>Qaybta C: Qoraalo</b> Buugga yar ee imtixaanka waxaa ku yaala qoraalo. Qoraalada si kore u akhri marka aad dhawaaqa maqasho. Si caadi ah u akhri, aadna ha u gaabin, aadna ha u dheerayn. Isku day inaad khaladyo badan galin. 30 ilbiriqsi ayaad qoraal walba haysataa. Waxaa suurtoagal ah inaad qoraal walba aadan dhammayn. Taas ha ka walwalin.</p>	<table border="1"> <tr> <th colspan="2" style="background-color: #0070C0; color: white;">Voorbeeld Tekst A</th> </tr> <tr> <td colspan="2">Tamar gaat naar de tandarts.</td> </tr> <tr> <td colspan="2">Zij heeft pijn aan haar kies.</td> </tr> <tr> <td colspan="2">Tamar is bang voor de tandarts.</td> </tr> <tr> <td colspan="2">De tandarts kijkt in haar mond.</td> </tr> <tr> <td colspan="2">Tamar heeft gelukkig alleen maar een gaatje.</td> </tr> <tr> <td colspan="2">Ze is blij als de tandarts klaar is.</td> </tr> <tr> <td colspan="2">Ze heeft nu geen pijn meer.</td> </tr> </table>	Voorbeeld Tekst A		Tamar gaat naar de tandarts.		Zij heeft pijn aan haar kies.		Tamar is bang voor de tandarts.		De tandarts kijkt in haar mond.		Tamar heeft gelukkig alleen maar een gaatje.		Ze is blij als de tandarts klaar is.		Ze heeft nu geen pijn meer.			
Voorbeeld Tekst A																			
Tamar gaat naar de tandarts.																			
Zij heeft pijn aan haar kies.																			
Tamar is bang voor de tandarts.																			
De tandarts kijkt in haar mond.																			
Tamar heeft gelukkig alleen maar een gaatje.																			
Ze is blij als de tandarts klaar is.																			
Ze heeft nu geen pijn meer.																			
<p><b>Qaybta D: Dhammaystir weeraha</b> Buugga yar ee imtixaanka waxaa ku yaala weero. Erayga saxda ah ka dooro sadexda eray ee lagugu siiyay dhamaadka weer walba. Marka aad dhawaaqa maqasho, weerta si kore u akhri, adiga oo erayga saxda ah gadaal uga daraya. Waxaad leedahay: <i>“Het is mooi weer. De zon schijnt.”</i></p>	<table border="1"> <tr> <th colspan="2" style="background-color: #0070C0; color: white;">Voorbeeld Zinnen A</th> </tr> <tr> <td style="text-align: center;">A</td> <td>Het is mooi weer. De zon ... loopt regent schijnt</td> </tr> </table>	Voorbeeld Zinnen A		A	Het is mooi weer. De zon ... loopt regent schijnt														
Voorbeeld Zinnen A																			
A	Het is mooi weer. De zon ... loopt regent schijnt																		

<p><b>Qaybta E: Qoraalo su'aalo wata</b></p> <p>Buugga imtixaanka waxaa ku yaalo qoraal su'aalo la socdo. Ka dib markii aad maqasho dhawaaqa si tartiib ah u akhri marka hore qoraalka iyo su'aalaha. Buugga imtixaanka wax waa ku qoran kartaa si aad u xasuusato adigoo isticmaalaaya Qalin ama qalinrasaas. Marka xigta waxaad mar labaad maqlee dhawaaq kale ka dibna waxaa ku xiga su'aalaha. Su'aal kasta jawaab gaaban ka bixxi markii aad maqasho dhawaaqa yar.</p> <p>Jawaabta su'aasha a. is <i>"woensdag"</i>.  Jawaabta su'aasha b. is <i>"bus"</i> ama <i>"met de bus"</i></p>	<p style="text-align: center;"><b>Voorbeeld Tekst A</b></p> <p>Mevrouw Jansen wacht samen met mevrouw Bol op de bus naar de stad. Er is vandaag markt in de stad. Elke week gaan mevrouw Jansen en mevrouw Bol samen naar de markt. Wat gaan ze vandaag kopen? Niets. Ze gaan naar de markt, omdat het leuk is. Dat doen ze elke woensdag.</p> <p><u>Vragen</u></p> <p>a. Op welke dag gaat mevrouw Jansen naar de stad?  b. Hoe gaat mevrouw Jansen naar de stad?</p>
---	--

**Dhammaadka imtixaanka, waxaad maqli doontaa:**

*"Dank u voor het bellen. U kunt nu ophangen."*

Kadibna telefoonka waad isa saari kartaa.

## 8. WARBIXIN DHEERI AH

Websaytka [www.naarnederland.nl](http://www.naarnederland.nl) waxaa ku jira tixraac websaytyo badan oo warbixin dheeri ah laga helayo. Waxaad sidoo kale websaytkan ka helaysaa dhammaan su'aalaha badanaa la is waydiiyo oo xirmadan ku saabsan.

### Wasaaradda Arimaha Dibadda

Su'aalaha ku saabsan is diiwaangalinta, lacag-bixinta iyo nidaamka waqtiga lagu jiro imtixaanada dhexgalka bushada, waxaad la xariiri kartaa qadka telefoonka ee dhexgalka bulshada ee Wasaaradda Arimaha Dibadda.

Telefoonka marka aad Nederland gudaheeda ka soo wacayso (070) 348 48 44 (9:00 - 12:30)

Telefoonka dibadda waa + 31 70 348 48 44 (9:00 - 12:30)

E-mail: [exameninburgering@minbuza.nl](mailto:exameninburgering@minbuza.nl)

Websayt: [www.minbuza.nl](http://www.minbuza.nl)

Fadlan ogow: Laynka telefoonka ee dhexgalka bulshada uma adeegsan kartid inaad ku qabsato ballanta imtixaanka lagu galo. Waxa kaliya oo aad tan samaysan kartaa inaad wacdo safaaradda ama qunsuliyadda guud.